

## Ka qayb qaadashadaada daryeelka caafimaadka

La xidhiidh shaqaalaha caafimaadka hadii aad qabto wax su'aalo ah oo la xidhiidha daryeelka cafimaadkaaga ama daweyntaada, ka dalbo in lagu siiyo qorshe daryeel oo aad wada samayseen shaqaalaha caafimaadka. Usheeg hadii ay jiraan waxaad xaasaasiyad ku tahay ama jidhkaagu diido. Usheeg jiradaada qoyskaaga ama qaraabadaada - sadaashaadu way ficnaanaysa hadii dadka qarabadaadu ay qayb ka noqdaan/ka qaybqaataan arinta. Faylkaaga waxaad ka heki karta www.1177.se





## Daawooyinkaaga

Usheeg dawooyinka aad cunto iyo hadii aad daawooyinka dhaqanka isticmaasho iyo sabaabta aad u cunto. Hore usoo qaado liiska dawooyinka aad hada isticmaasho. Usheeg shaqaalaha hadii ay jirto daawo aad cunto oo aanad garanayn sabaabta aad u cunto/waxa aad u cunto. Lahadal dhakhtar, kalkaaliso ama shaqaalaha farmasiiga ka shaqeeya ee dawooyinka bartay, hadii aad wax su,aala ka qabto dawooyinkaaga.



## Dhaqdhaqaaqu wuu u fiican yahay caafimaadkaaga

Dhaqdhaqaaq same intii ugu badan ee aad karto. Hadii ay kuu suurto galayso maalin kasta soo soc soco/soo luge. Iska ilaali inaad sariirta jiifto maalintii. Ka qayb qaado hawlaha dadka loogu talo galay ee laga sameeyo qaybta aad joogto.



## Cuntadda mihiimka ah

Cuntadda cun maalin kasta wakhti isku mid ah, waydii shaqaalaha hadii aanad hubin oo aad rabto inaad ogaato cuntadda adiga kuu fiicaan ee caafimaadkaagu ku jiro.




AMAANKAAGA/NABADGALYADAADA ISBITAALKA QAYBTA DIMIRKA

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

Din säkerhet Psykiatri - version 1.0 VGR6129

rog

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN



## Qof naftiisa dhaawaca/Isdhaawicid

**Lahadal shaqaalaha hadii aad dareemayso caafimaad daro/aanad wanaagsanayn. Usheeg shaqaalaha hadii ay kugu jiraan fikrado ah in aad naftaada waxyeelo u gaysato ama aad kaw iska siisi/isdisho.**



## Kahortaga kufida/dhicida

**Isticmaal kabo deggen oo cagta si fiicaan u fadhido ama sharabaadada/sigisyo ah nooca aan lagu siiban. Shaqaalaha ka dalbo inay ka caawiyaan hadii aad dawakhaad dareemayso ama sidii qof dhacaya oo kale marka aad kacayso si aad u socoto. Hadii aad si fuduud u dawakhdo/wareerto cabaar ku naso sariirta koonaheeda oo cagaha dhaqdhaaqaaji adiga oo kola saaraya dhulka kola ka qaadaya, biyo yar cab inta aanad kicin.**





## Hadii lagu siinayo daryeelayo caafimaad adiga oo aan rabin

**Waxaad ka dalbata in lagu siiyo warqadda sharaxaysa dadka qasabka lagu xanaanaynayo ee ay soo saaran SKL. Warqaddasi waxay ku qoran tahay luuqado badan oo kala duwan. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho qof ku caawiya/stödperson. Xaq waxaad u leedahay inaad go,aanada qaar ka dacwooto/rafcaan ka qaadato iyo inaad xaq u leedahay inaad hesho wakiil sharciyaqaana. Wixii su,aalo aad qabto waydii shaqaalaha.**



## Marka lasoo gaadho wakhtigii aad ka baxaysay isbitaalka

**Inta aanad ka bixin isbitaalka waa inaad hesha:**
**- warbixin ku saabsan ka bixida isbitaalka iyo warbixin la xidhiidha daryeelka iyo dawooyinkaaga oo lagaaga waramo.**
**- warbixin ku saabsan sida aad ula xidhiidhayso rugtaada caafimaadka ee furan/öppenvård.**
**- warbixin ku saabsan suurtogal nimada hadii loo baahdo la socodka daryeelkaaga iyo daweeyntaada.**
**La xidhiidh uruuradda bukaan socodka. Shaqaalaha waydii meelaha lagala xidhiidhi karo.**




rog